



**Warbixin ku saabsan gaadiidka  
iskuullada ee gaarka ah**

**Ubadkaaga waxaa loo oggolaaday gaadiidka iskuullada. Sidaas awgeed, waxaad qoraalkaan ka aqrisan kartaa warbixin xilhaayeha xannaanadda/waalidka loogu tala-galay. Haddii aad u baahan tahay warbixin dheeraad oo ku saabsan gaadiidka iskuullada, nidaamyada musaafadda xiriir la leh ama qaabka go'aan arrinta looga gaaro, ka aqriso barta internetka: [www.vaxjo.se/skolskjuts.se](http://www.vaxjo.se/skolskjuts.se)**

Ardayda xaq ugu leh gaadiidka iskuullada gaarka ah ee ay ku tagaan iskuullada gaarka ah: Kungsmadskolan, Ljungfälleskolan, Teleborg Centrum skola iyo waaxyada [resursenheter]: Sofieberg iyo Pär Lagerkvistskolan.

Gaadiidka iskuullada gaarka ah ma ahan sida socdaallada taxiyada oo kale, ee waxaa weeyaan gaadiid tiradiisa xadadan tahay oona leh jadwal saacadaha u gaar ah. Socdaallada waxay aroortii badi ahaan ka soo bilaawdaan agagaaryada degmada iyagoo ku wajihan bartamaha magaalada Växjö. Markii dugsi-dhigashada ay dhamaato waxay ku wajahan yihiin halkii aroortii ay ka soo dhaqaaqeen. Saacadaha gaadiidka u dhaqaaq waxay waafaqsan yihiin saacadaha casharrada la dhigto. Taa-soo arday kasta u suurtagelinasyo in u iskuulka ku sugan yahay markii casharrada ay bilaabanayaan. Gaadiidka dib u noqoshada wuxuu iskuullada ka dhaqaaqa ku dhowaad tobban daqiqo markii maalin-dugsiyedka ay dhamaato.

### **Qaabka mas'uuliyadda loo kala qaybsaday**

Waalidiinta waxay ilmaha mas'uul ka yihiin ilaa gaadiidka iskuulka ay kaga fuulaan maxatada la shaaciay in gaadiidka ay ka fuulaan, iyo laga bilaabo goorta ay gaadiidka kaga degan maxatada la shaaciay in ay gaadiidka ay kaga degaan kaddib markii u iskuulka dhamaado. Shirkadda gaadiidka waxay ballanqaadaysa, in wadaha gaadiidka u ardayda mas'uul ka yahay markii gaadiidka ay saaran yihiin iyo in u tixgeliyo nidaamyada traafikada ee hirgaleen. Dhacdooyinka xiriirka la leh gaadiidka iskuullada, sida dhacdo ama fal meelkadhad ku salasyan waxaa xaaladdaas mas'uul ka ah in agaasimaha dugsiga u arrinta baaro.

## **Nidaamyada amniga**

Waa in hab xasilan gaadiidka ugu degaan. Ardayda waa in hab xasilan u fadhiyaan xilliga socdaalka. Waa in suunka amniga [Säkerhetsbält] ay isticmaalaan.

Wixii su'aallo ah oo ku saabsan Gaadiidka iskuullada waxaa ka jawaabo gacan-hayaha arrimaha gaadiidka iskuullada 0470-410 00, skolskjutsgruppen@vaxjo.se www.vaxjo.se/skolskjuts Waa maxay gaadiidka iskuullada gaarka ah? Gaadiidka iskuullada gaarka ah waa gaadiid ardayda loogu talagalay oo u dhaxeeyo adreeska guryahooda iyo iskuullada gaarka ah iyo waaxyada loo yaqaanno [resursenheter]. Baabuurrada gaadiidka iskuullada guud ahaan waa kuwa heshiis qandaraas ku salaysan. Haseyee-she, xaaladaha qaarkood waxaa dhici karto in gaadiidka iskuullada ahaan la adeegsado gaadiidka guud.

## **Wax iska beddelka baahida gaadiidka iskuullada loo qabo**

Haddii baahida gaadiidka iskuullada loo qabo ay hab joogto ah wax iska beddesho waa in maamulka iskuulka ama gacan-hayayaasha arrimaha gaadiidka iskuullada la wargeliyo, sida tusaale haddii qoysku u guriga ka guuro (adrees cusub). Sidoo kale waa in wargelin laga helo xitaa markii ay jiraan isbeddelo kumeelgaar ah ee xiriir la leh baahida gaadiidka iskuullada loo qabo, sida tusaale haddii ubadkaaga u xannuunsado:

- **Flexbuss:** taleefan 0481-548 00, e-mail: oms@flexbuss.se
- **Taxikurir:** taleefan 0470-160 00, e-mail: info@taxikurirvxo.se
- **Växjö taxi:** taleefan 0470-135 00, e-mail: boka@vaxjotaxi.se

## **Gaadiidka iskuullada iyo kormeerida xillyada gaaban [korttidstillsyn]**

Gacan-hayaha arrimaha gaadiidka iskuullada wuxuu go'aamin karaa gaadiidka u dhaxeeyo iskuulka gaadiidka iskuullada iyo kormeerida xillyada gaaban [korttidstillsyn].

## **Ku saabsan gaadiidka saaxiibka [Kompisåkning]**

Arrimaha gaadiidka saaxiibka [Kompisåkning] waxaa maareeyo maamuleha iskuulka ee arrinta khuseeyso. Warbixin dheeraad darteed la xiriir shaqaalaka iskuulka.

### **Waa maxay gaadiidka iskuulla gaarka ah?**

Waa gaaadiid la isticmaalo, oo u dhaxeeyo guryaha ardayda, iskuullada gaar ay dhigtaan iyo iskuullada loo yaqaanno [resursenheter]. Baabuurrada gaadiidka iskuullada guud ahaan waa kuwa heshiis qandaraas ku salaysan. Haseyeeshe, xaaladaha qaarkood waxaa dhici karto in gaadiidka iskuullada ahaan la adeegsado gaadiidka guud.

**Wixii su'aallo ah waxaa ka jawaabo gacanhayaha  
gaadiidka iskuullada: 0470-410 00,  
[skolskjutsgruppen@vaxjo.se](mailto:skolskjutsgruppen@vaxjo.se), [www.vaxjo.se/skolskjuts](http://www.vaxjo.se/skolskjuts).**



**Växjö  
kommun**